

# Xuquuqdaada iyo Waajibaadka

## Ohio Department of Job and Family Services (Wasaaradda Shaqada iyo Adeegyada)

**Akhri dhamaan warkan ka hor intaanad ku saxeehin magacaaga. Haddii aanad fahmin qayb ka mid ah dukumentigan, weydiiso gargaar ka hor intaanad saxeehin. Koobiga warkan ayaa lagu siin doonaa si aad diiwaankaaga ama kaydkaaga ugu darsatid. Inta lagu jiro dukumentigan, ereyada “adiga” iyo “kaaga/taada” waxa loola jeedaa xubin kasta oo aad u codsanaysid gargaar ama faa’iidooyin.**

### **Waxa aad Xad u leedahay Dhageysi Gobol**

Waxa aad xaq u leedahay inaad codsatid dhageysi (af ahaan ama qoraal ahaan) lagu hor qabto Ohio Department of Job and Family Services (ODJFS) haddii:

- Codsigaaga ayaa la diiday, laakiin waxa aad rumeysan tahay in adeeggu kuu banaan yahay;
- Laguuma sheegin gudaha 45 maalmood ka dib taariikhdiis aad codsigaaga dhiibtay inuu kuu banaan yahay iyo in kale gargaar dhaqaale ama caafimaad;
- Laguuma sheegin qoraal ahaan gudaha 30 maalmood laga bilaabo taariikhda aad dhiibtid codsingaa in uu kuu banaan yahay gargaarka cuntada ama adeegyada bulshada iyo in kale;
- Laguuma sheegin qoraal ahaan gudaha 90 maalmood ka dib taariikhdiis aad codsigaaga dhiibtay inuu kuu banaan yahay iyo in kale adeeg taasoo ku saleysan go’aan naafo oo ku saabsan Disability Financial Assistance (DFA) (Gargaarka Dhaqaale ee Naafada) ama Medicaid;
- Raali kama tihid nooca ama qadarka gargaarkaaga;
- Raali kama tihid inaad ka qaybgashid hawlaha shaqo raadinta, hawlaha horumarinta xagga shaqada, ama hawlo shaqo oo beddelaad ah;
- Waxa lagu diiday adeeg caafimaad ama ilko;
- Raali kama tihid in la yareeyo ama la joojiyo gargaarkaaga;
- Qoraal laguuguma sheegin sababta gargaarkaaga wax looga beddelayo waxana aad xaq u leedahay dhageysi ka hor inta aan isbeddelka la sameyn.

Waxa kale oo aad xaq u leedahay shir fudud oo aad la yeelatid xafiiska wasaaradda shaqada iyo adeegyada qoyska ee degmadaada (county department of job and family services) (CDJFS). Haddii khalad la sameeyay, waa la sixi karaa. Haddii aanad raali ka ahayn natiijooyinka shirka aad la yeelatid xafiiska degmada, waxa aad wali yeelan kartaa dhageysi gobolka ah.

Waxa codsigan lagu siin doonaa qoraalka la yidhaahdo “Sharaxaadda Hababka Dhageysiga Gobolka” (JFS 04059). Si taxadir leh u akhri si aad u fahamtid xuquuqdaada dhageysiga iyo habka dhageysiga laftiisa.

### **Laguuma Sameyn Karo Takooris ku Saleysan Naafo**

Haddii aad leedahay xaalad jidh ama maskaxeed oo si xoog ah u yareynaysa ama u xadeynaysa mid ama in ka badan oo ah hawlaha waaweyn ee nolosha, waxa laga yaabaa inaad leedahay xuquuq hoos timaada Qaybta 504 ee Xeerka Dhaqancelinta (Rehabilitation Act) ama Xeerka Maraykanka leh Naafo (Americans with Disabilities Act). Xaaladaha jidh ama maskaxeed waxa ku jira, tusaale ahaan, dhibaato waxbarasho, daahid awood maskax, taariikh walaf daroogo ama aalkolo, diiqad, dhibaato dhaqdhaqaaqa ah, ama dhibaato maqalka ama aragga ah.

Waxa aad noo sheegi kartaa haddii aad leedahay naafo. Haddii aanad sameyn karin wax aanu ku weydiisanay inaad sameysid, waxa aanu kaa caawin karnaa inaad sameysid ama waxa aanu beddeli karnaa waxa lagaa rabo inaad sameysid. Halkan waxa ku yaala dhawr siyaabood oo aanu kuu caawin karno:

- Waa aanu ku soo wici karnaa ama ku soo booqan karnaa haddii aanay suurogal kuu ahayn inaad timaadid xafiiskayaga.
- Waxa aanu kuu sheegi karnaa waxa uu yahay macnaha warqaddan.
- Haddii aad ku jirtid ‘Ohio Works First’ (OWF), waa aanu ku caawin karnaa haddii aanad sameyn karin wax ku yaala heshiiskaaga isku-filaanshaha.
- Waxa aanu kaa caawin karnaa soo-saarista qorshe shaqo-helid oo kuu oggalaanaya inaad shaqeytid xiitaa haddii aad leedahay naafo.
- Waxa aanu kaa caawin karnaa inaad raacfaan ama ambiil qaadatid.

Haddii aad u baahan tahay nooc ah gargaar, weydii shaqaalaha ku qaabilsan. Haddii aad maqalka wax ka qabtid ama aanad hadli karin ama aanad Ingiriisiga ku hadli karin ama u fahmin karin si wacan oo ku filan la-xidhiidhista CDJFS waxa aanu ku siin doonaa turjubaan aan adiga kharash kugu joojin.

### **Waa Aanu ku Caawin Doonaa Haddii Ingiriisiga Aanu Ahayn Afkaaga Koobaad**

Dadka aan ku hadli karin, ama uu dhib ku yahay fahamka afka Ingiriisiga waxa laga badbaadiyay takooris ku saleysan asalka wadankooda ama qowmiyadooda.

Waxa kale oo laga yaabaa in aanu awoodno in aanu ku siino tarjumad dukumentii oo ah afka ama qoraal.

**Lambarkaaga Sugidda Bulshada (Social Security Number)**

Waa inaad siisid CDJFS lambar sugid bulsho (social security number), ama waa inaad u codsatid lambar sugid bulsho, qof kasta oo codsanaya gargaar. Haddii aanad haysan lambar sugid bulsho, waxa aanu kaa caawin karnaa sidii aad mid u heli lahayd. Waxa laga yaabaa inaad na baahnayn inaad na siisid warkaa dhamaan xaaladaha.

Ururinta warkan, oo uu ku jiro lambarka sugidda bulsha xubin kasta oo qoyska ah, waxa fasaxay Xeerka Gargaarka Cuntada ee 1977 (Food Stamp Act of 1977), qaabkiisa la kabay, 7 U.S.C. 2011-2036, Section 1137(a) ee Social Security Act, 42 C.F.R., 435.910, iyo xeerarka 5101:1-1-03 iyo 5101:1-3-09 ee Ohio Administrative Code.

1) Lambarka sugidda bulshada (social security lambar) waxa loo isticmaali doonaa in lagu hubiyo warka aad na siisid iyada oo la barbardhigayo war ay hayaan federalka, gobolka, iyo dawladaha hoose; hababka isbarbardhigga ee kombiyuutarada; iyo dib-u-fiirinta barnaamijyada ama hubinta si loo hubsado inay kuu banaan yihiin barnaamijyada gargaarka dawladdu ama, ilaa xadka uu oggol yahay sharciga federalku, si gargaar looga geysto go'aaminta u-banaanaanta barnaamij kale oo uu gargaaro gobolku, federalku, ama barnaamij uu gargaro federalku oo bixiya gargaar kaash ama alaab ah ama adeegyo kuwaasoo toos loo siiyo dadka kuna saleysan baahi ama iyada oo ulajeedadu tahay badbaadinta caruurta. Waxa kale oo warkan loo isticmaali doonaa in lala sodo adeecidda xeerarka barnaamijka iyo maamulidda barnaamijka.

2) Lambarkaaga sugidda bulshada waxa la isticmaali doonaa marka lala xidhiidhayo dadka ama hay'adaha haboon si go'aan looga gaadho u-banaanaantaada loona xaqiijiyo war aad siisay barnaamij gargaar oo uu ku jiro, balse aan ku koobnayn, Ohio Works First (OWF), Medicaid, gargaarka cuntada (food stamps), Disability Financial Assistance (DFA) (Gargaarka Dhaqaale ee Naafada), qadada dugsiya, barnaamijyada hay'adaha ee bixiya adeegyada caruurta, iyo Prevention Retention and Contingency (PRC); tusaale ahaan, dakhli, shaqo hore ama imminka ah, ilo dhaqaale, magdhowga shaqaalaha, faa'iidooyinka naafada ama faa'iidooyin iyo barnaamijyo kale oo la mid ah. Waxa laga yaabaa in warkaasoo kale uu saameeyo u-banaanaanta iyo heerka gargaarka qoyskaaga. Haddii aad na siisid war been ah, waxa laga yaabaa in lagaa qaado talaabo sharci ah.

3) Dadka doonaya inay helaan gargaarka Medicaid waa inay na siiyaan lambarka sugidda bulshada ama ay mid codsadaan. Dadka isku qoys ah ee aan doonaynin inay helaan gargaarka Medicaid qasab kuma ah inay na siiyaan lambar sugid. Waxa aad si ikhtiyaar ah noo siin kartaa lambarka sugid bulsho. Haddii aad na siisid, waxa aanu lambarkaaga sugidda bulshada u isticmaali doonaa hubinta dakhliga. Waxa kale oo laga yaabaa inaanu lambarkaaga sugidda bulshada u isticmaalno in lala xidhiidho caymisyada caafimaad ee kale iyo in la fiiriyo dabool caafimaad oo kale si loo bixiyo dhamaan ama qayb ka mid ah kharashkaaga ama biilashaada caafimaad.

4) Xagga gargaarka cuntada (food stamps), lambarka sugidda bulshada waxa loo isticmaali doonaa in la hubiyo aqoonsiga xubnaha qoyska, in la joojiyo ka-qaybgal laba jeer ah, iyo in la fududeeyo isbeddelada tirada badan. Haddii aad codsatay ama qaadatid gargaarka cuntada

(food stamps), waxa laga yaabaa in lambarkaaga sugidda bulshada loo isticmaalo isbarbardhig ah baadhitaan dambi ama isbarbardhig dad jabiyay sii-dayn xad leh (probation, parole). Haddii is-keenid ka soo baxdo isbarbardhigga, adreeska imminka iyo sawirka waxa la siin karaa hay'adaha sharci fulintae haboon marka la go'aamiyo inuu jiro amar u-qabasho dambi culus ama aad jabisay sii-dayn xad leh.

**Waa in dhamaan dadka qoyskaaga ee doonaya inay helaan gargaarka cuntada na siiyaan lambarkooda sugidda bulshada.**

Haddii qof kasta oo jooga gurigaga aanu doonaynin inuu na siiyo warka lambarkiisa sugidda bulshada, waxa qofka lagu magacaabi karaa "ma-codsade" (Non-applicant). Waxa wali xubnaha qoyska ee ah "ma-codsade" laga rabaa inay ka jawaabaan su'aalaha saameeya u-banaanaanta xubnaha qoyska ee ah "codsade," sida warka dakhliga, ilaha dhaqaale, xaaladda shaqo-ka-fadhiisi, iyo Intentional Program Violations (IPV) (Jabinta Barnaamij ee ah Kas). Waa in dakhliga iyo ilaha dhamaan xubnaha qoyska ee "ma-codsade" ah xisaabta lagu

123-456-7890  
Jane Anne Doe  
Signature

daro marka la go'aaminayo u-banaanaanta iyo heerka gargaarka ee qoyska. Xubnaha kale ee qoyska waxa wali suurogal u ah inay helaan gargaarka cuntada haddii gargaar u banaan yahay.

5) Wixii ah barnaamijyada OWF, DFA ama PRC, waxa kale oo lambarkaaga sugidda bulshada isticmaali kara adeegyada caruurta ee dadweynaha marka taasi la xidhiidho siinta adeegyo qoyska, hubinta gargaar ama adeegyo soo mara barnaamijyada adeegyada caruurta ee dadweynaha, iyo badbaadinta caruurta. Haddii aad codsatid ama aad qaadatid OWF, DFA, ama PRC, waxa lambarkaaga sugidda bulshada loo isticmaali karaa isbarbardhig baadhis dambi; baadhis dadka jabiyay sii-dayn xad leh taasoo ay sameynayaan hay'adaha sharci-fulintu; ama ulajeedooyin baadhitaan, dambi-ku-qaadis, iyo talaabooyin xeer xiqaab ama madani oo aan ka baxsanayn waajibaadka rasmiga ah ee hay'adaha sharci-fulinta.

**Qof kasta oo ka tirsan qoyskaaga oo doonaya inuu helo gargaarka OWF iyo DFA waa inuu na siiyo lambarkiisa sugidda bulshada.**

Waxa laga yaabaa in aanu go'aan ku gaadho in xubno gaar ah oo ka tirsan qoyskaaga aanu u banaanayn gargaar, tusaale ahaan, ma haystaan sharciga imigarayshanka ee saxda ah. Haddii taasi dhacdo, waxa laga yaabaa in xubno kale oo qoyskaaga ah ay wali suurogal u tahay inay helaan gargaar haddii sida kale ay taasi u banaan tahay. Haddii aad doonaysid inaanu go'aan ka gaadho haddii xubnaha kale ee qoyska ay wax u banaan yihiin, waxa wali lagaa rabi doonaa inaad na siisid lambarkooda sugidda bulshada.

6) Wixii ah gargaar kaash iyo caafimaad ee hoos yimaada Barnaamijka Dib-u-dajinta Qaxootiga (Refugee Resettlement Program), qasab kuguma aha inaad na siisid lambar sugid bulsho. Waxa laga yaabaa in CDJFS ay codsato inaad bixisid lambar sugid bulsho, laakiin waa inay kuu sheegaan sida ay u isticmaali doonaan lambarka iyo in siinta lambarku tahay ikhtiyaar.

## Waajibaadkaaga Soo-sheegista

Barnaamijyada Kaashka  
Waajibaadka Soo-sheegista

### Waxyaabaha lagaa rabo inaad soo sheegtid haddii aad qaadatid gargaarka kaashka.

Wixii khuseeya barnaamijyada kaashka (Ohio Works First, Disability Financial Assistance iyo Refugee Cash Assistance), waa inaad u soo sheegtid CDJFS, gudaha 10 maalmood laga bilaabo maalinta aad ka warheshid isbeddelada ku dhacay xaaladdaada, sida:

- Waxa aad u guurtay guri ama adrees kale;
- Qof ayaa kula soo dagay ama kaa guuray;
- Meesha uu dakhli (ama ha la shaqeysto ama yaan la shaqeysan) ka soo galo qof qoyska ka tirsan ayaa isbeddel ku dhacay ama dakhligiisa ayaa sare ama hoos u kacay;
- Qof ayaa helay, beddelay, ama ka luntay shaqo;
- Ilmo ayaa iskaga tagay dugsiiga;
- Waxa isbeddel ku dhacay waajibaadka sharci ee ah in la bixiyo taageero ama masruuf ilmo;
- Qof qoyska ka tirsan ayaa uur yeeshay ama uur ayaa joogsaday;
- Isbeddel ku dhacay warka ku saabsan waalidka maqan;
- Waxa isbeddel ku dhacay habka daganaanshaha ee waalid aan qaangaadh ahayn;
- Qof ka tirsan qoyska ayaa jabiya shuruud sii-dayn xad leh (probation, parole);
- Qof qoyska ka tirsan ayaa noqday dambiile baxsad ah.

Barnaamijka Disability Financial Assistance (Gargaarka Dhaqaale ee Naafada) kaligii, waxa kale oo lagaa rabaa inaad soo sheegtid:

- Marka qiimaha waxa aad leedahay (maalkaaga) uu isbeddelo, sida lacag bangiga ku jirta, maalgalin shirkadeed (stocks, bonds) iyo qiimaha kaash ee caymiska, ama waxa aad iibisay ama wareejiyay lahaanshaha guri ama dhul; ama
- Marka qof qoyska ka tirsan uu helo lacag kuusan oo hal mar ah.

Gargaarka Cuntada (Food Stamp)  
Waajibaadka Soo-sheegista

### Waxyaabaha lagaa rabo inaad soo sheegtid haddii aad qaadatid gargaarka cuntada.

#### Qoysaska aan lahayn dakhli la shaqeystay :

Haddii aad codsanaysid ama aad dib u codsanaysid gargaarka cuntada isla markaana qof ka tirsan qoyskaaga aanu lahayn dakhli la shaqeystay, waa inaad isbeddelada soo socda u soo sheegtid xafiiska adeegyada shaqada iyo qoyska ee degmada (county department of job and family services):

Isbeddeladan soo socda waa in lagu soo sheego gudaha 10 maalmood laga bilaabo taariikhda aad ogaatid isbeddelada ku dhacay xaaladdaada:

- Waxa aad u guurtay adrees kale waxana yimi isbeddel ku dhacay kharashka nolosha (kirada ama bixinta daynta guriga, cashuuraha guriga, caymiska guriga, adeegyada guriga);
- Qof ayaa kula soo dagay ama kaa guuray;
- Waxa isbeddel ku dhacay waajibaadka sharci ee ah in la bixiyo taageero ama masruuf ilmo;
- Qiimaha waxa aad leedahay (maalkaaga) ayaa isbeddelay, sida lacag bangiga ku jirta, maalgalin shirkadeed (stocks, bonds).

Isbeddeladan soo socda ee ku dhaca dakhliga kooxdaada gargaarka waa in lagu soo sheego gudaha 10 maalmood laga bilaabo lacag siintaada ugu horeysa iyada oo sababtu tahay:

- Isbeddelo ka badan \$50 oo ku dhacay isku-darka dakhliga guud bishii ee aan la shaqeysan ee qoyskaaga (lagaama rabo inaad soo sheegtid isbeddelada ku dhaca jeeggaaga OWF ama DFA);
- Isbeddel ku dhacay dakhliga qof kasta oo ka tirsan qoyska;
- Qof ayaa bilaabay shaqo, beddelay ama ka luntay shaqo;
- Isbeddel ku dhacay tirada mushaharka ama inta lagu siiyo;
- Isbeddel ku dhacay xaaladda shaqo wakhti buuxa ama wakhti badh ah;
- Isbeddelo kasta oo ku dhaca saacadaha shaqada qof qoyska ka tirsan oo ah qof weyn oo laxaad leh oon lahayn cid uu masuul ka yahay (able-bodied adult without dependents) (ABAWD) oo qaata gargaar wakhti xadeysan oo ka hooseeya 20 saacadood todobaadkii, 80 saacadood bishii.

Isbeddelada laga rabo qoysaska qaata gargaarka cuntada waxay ku taxan yihiin qoraalka "Change Report for Assistance Groups with No Earned Income" (JFS 07443) (Isbeddelada Laga Rabo Inay Soo Sheegaan Kooxaha Gargaar Qaata ee Aan Lahayn Dakhli la Shaqeystay), waxana lagu soo sheegi karaa foomkan, telefoon, ama xubin qoyska ka tirsan ayaa qof ahaan u soo sheegi kara.

#### Qoysaska Leh Dakhli la Shaqeystay:

Haddii aad codsanaysid ama aad dib u codsanaysid gargaarka cuntada isla markaana qof ka tirsan qoyskaaga uu leeyahay dakhli la shaqeystay, waa inaad isbeddelada soo socda u soo sheegtid xafiiska adeegyada shaqada iyo qoyska ee degmada (county department of job and family services) gudaha 10 maalmood ka dib maalintii ugu dambeysay bisha uu isbeddelku markii ugu horeysay dhacay (marka laga soo qaado inaad haysatid ugu yaraan 10 maalmood oo aad ku soo sheegtid isbeddelka):

- Haddii dakhligaaga bishii uu ka badan yahay xadka dakhliga guud ee bishii ee qoyskaaga ee lagu muujiyay oggalaanshaha gargaarka cuntada ama ogeysiiska isbeddelka; iyo/ama
- Isbeddelo kasta oo ku dhaca saacadaha shaqada qof qoyska ka tirsan oo ah qof weyn oo laxaad leh oon lahayn cid uu masuul ka yahay (able-bodied adult without dependents) (ABAWD) oo qaata gargaar wakhti xadeysan oo ka hooseeya 20 saacadood todobaadkii, 80 saacadood bishii.

Isbeddelada laga rabo qoysaska qaata gargaarka cuntada waxay ku taxan yihiin qoraalka "Change Report for Assistance Groups with Earned Income" (JFS 04196) (Isbeddelada Laga Rabo Inay Soo Sheegaan Kooxaha Gargaar Qaata ee Leh Dakhli la Shaqeystay), waxana lagu soo sheegi karaa foomkan, telefoon, ama xubin qoyska ka tirsan ayaa qof ahaan u soo sheegi kara.

#### Kaliya Gargaarka Cuntada :

Si aad u heshid ka-jaris kharashyada soo socda waa inaad u soo sheegtid cadeyn na u keentid shaqaalaha ku qaabilsan:

- kirada ama bixinta daynta guriga;
- adeegyada guriga iyo/ama kharashka hoyga;
- kharashka caafimaadka;
- kharashka daryeelka qof aad masuul ka tahay; iyo
- taageero ilmo oo sharci ah oo waajib ah oo la siiyo qof aan qoyska ka tirsanayn.

**Ka-soo bixid la'aanta soo-sheegidda ama cadeynta mid ka mid ah kharashyada kor lagu taxay waxa loo arki karaa hadal uu qoyskaagu ku leeyahay uma baahnin inaan helno ka-jari s kharashka aan la soo sheegin.**

**Warka Xaaladda Muwaadinnimada iyo Imigarayshanka**

Waxa aanu ku weydiin doonaa cadeynta muwaadinnimada iyo xaaladda imigarayshan ee qof kasta ee tirsan qoyskaaga ee doonaya inuu helo gargaar.

1) Dadka doonaya inay helaan gargaarka ama faa'iidooyinka Medicaid waa inay na siiyaan war ku saabsan muwaadinnimada ama xaaladda imigarayshan. Haddii aad codsi u samenaysid ilmo, waa inaad na siisid war ku saabsan muwaadinnimada ama xaaladda imigarayshan ee ilmaha. Dadka isku qoys ah ee aan doonaynin inay helaan gargaarka Medicaid lagama rabo inay na siiyaan war ku saabsan muwaadinnimada ama xaaladda imigarayshan. Dadka codsanaya gargaarka caafimaadka ee degdegga ah ee ajanabiga (alien emergency medical assistance) lagama rabo inay na siiyaan war ku saabsan muwaadinnimada ama xaaladda imigarayshan.

**2) Gargaarka Cuntada (Food Stamps)**

Dhamaan dadka ka tirsan qoyskaaga ee doonaya inay helaan gargaarka cuntada waa inay na siiyaan war ku saabsan mudaadinnimada ama xaaladda imigarayshan. Haddii qof ka tirsan qoyskaaga aanu doonaynin inuu na siiyo war ku saabsan muwaadinnimadiisa ama xaaladdiisa imigarayshan, waxa qofka lagu magacaabi doonaa ma-codsade. Taa macnaheedu waxa weeye qofkaa lagama soo qaadi doono codsade umana banaana gargaarka cuntadu.

Dadka codsanaya gargaarka caafimaadka ee degdegga ah ee ajanabiga (alien emergency medical assistance) lagama rabo inay na siiyaan war ku saabsan muwaadinnimada ama xaaladda imigarayshan.

Waxa wali xubnaha qoyska ee ah "ma-codsade" laga rabaa inay ka jawaabaan su'aalaha saameeya u-banaanaanta xubnaha qoyska ee ah "codsade," sida warka dakhliga, ilaha dhaqaale, xaaladda shaqo-ka-fadhiisi, iyo Intentional Program Violations (IPV) (Jabinta Barnaamij ee ah Kas). Waa in dakhliga iyo ilaha dhamaan xubnaha qoyska ee "ma-codsade" ah xisaabta lagu daro marka la go'aaminayo u-banaanaanta iyo heerka gargaarka ee qoyska. Xubnaha kale ee qoyska waxa wali suurogal u ah inay helaan gargaarka cuntada haddii gargaar u banaan yahay.

**3) OWF iyo DFA**

Waa in qof kasta oo ka tirsan qoyskaaga oo doonaya inuu helo gargaarka ama faa'iidooyinka OWF iyo DFA na siiyo war ku saabsan xaaladda imigarayshan ama muwaadinnimo. Waxa laga yaabaa inaanu go'aan ku gaadhno in xubno ka tirsan qoyskaaga aanuu u banaanayn gargaar sababta oo ah, tusaale ahaan, ma laha sharci imigarayshan oo sax ah. Haddii taasi dhacdo, waxa laga yaabaa in xubno kale oo qoyskaaga ah ay wali suurogal u tahay inay helaan gargaar haddii sida kale ay taasi u banaan tahay. Haddii aad doonaysid inaanu go'aan ka gaadhno haddii xubnaha kale ee qoyska uu u banaan yahay OWF iyo DFA, waxa wali lagaa rabi doonaa inaad noo sheeg muwaadinnimadooda ama xaaladdooda imigarayshan. Waxa kale oo loo baahan doonaa inaad wax nooga sheegtid dakhliga qoyskaaga kana jawaabtid su'aalaha kale ee uu ku weydiyo CDJFS.

**4) Barnaamijka Dib-u-dajinta Qaxootiga (Refugee Resettlement Program)**

Wixii ah gargaarka kaashka iyo caafimaadka ee hoos yimaada Barnaamijka Dib-u-dajinta Qaxootiga, waa inaad wax nooga sheegtid xaaladda muwaadinnimo iyo imigarayshan ee qof kasta oo

ka tirsan qoyskaaga. Waxa laga yaabaa inaanu go'aan ku gaadhno in xubno gaar ah oo ka tirsan qoyskaaga aanuu u banaanayn gargaar sababta oo ah, tusaale ahaan, ma haystaan sharci imigarayshan oo sax ah. Haddii taasi dhacdo, waxa laga yaabaa in xubnaha kale ee qoyska uu wali u banaan yahay inay helaan gargaar haddii uu sida kale ugu banaan yahay. Haddii aad doonaysid inaanu go'aan ka gaadhno haddii xubnaha kale ee qoyska uu u banaan yahay kaash iyo gargaarka caafimaad ee hoos yimaada Barnaamijka Dib-u-dajinta Qaxootiga iyo haddii kale, waxa lagaa rabi doonaa inaad wax nooga sheegtid xaaladdooda muwaadinnimo ama imigarayshan. Waxa kale oo loo baahan doonaa inaad wax nooga sheegtid qoyskaaga dakhligiisa kana jawaabtid su'aalaha kale ee uu ku weydiyo CDJFS.

**Digniinta Ganaaxa Gargaarka Cuntada**

Si loo hubiyo in qoyskaaga adeeggu u banaan yahay oo ay helaan qadarka saxda ah ee gargaarka cuntada, waxa saraakiisha federalka, gobolka iyo degmadu hubin doonaan warka aad na siisid. Waxa warka la hubin doonaa iyada oo la isticmaalayo dakhliga gobolka iyo habka hubinta u-banaanaanta, habka hubinta dadka aan gargaarka loo oggolayn, hababka kale ee isbarbardhigga kombiyuutarada, dib-u-fiirinta barnaamijyada iyo hubinta. Waxa kale oo laga yaabaa in warka qaarkii loo diro adeegga imigarayshanka iyo wadaniyeynta (immigration and naturalization service) si loo arko haddii warka aad na siisay uu sax yahay. Warka ku saabsan dadka aan bixin lambar sugid bulsho (social security number) lalama wadaagi doono U.S. Citizenship and

Waa aanu hubinaa warka aad na siisid si loo habsado inaad heshid qadarka saxda ah ee gargaarka.

Immigration Services (USCIS) (Adeeygada Muwaadinnimada iyo Imigarayshanka). Waxa kale oo laga yaabaa in warka aad na siisid uu hubiyo barnaamijyada gargaarka ee kale ee federalka, iyo barnaamijyada gobolka ee federalku caawiyo, sida qadada dugsiga, OWF, iyo Medicaid. Haddii si ogaan ama kas ah aad noo siisid war khalad ah, waxa laga yaabaa in lagu diido gargaarka cuntada, waxana laga yaabaa in talaabo sharci ah lagaa qaado. Haddii lagu siiyo gargaar ama faa'iidooyin aad u badan, waxa kale oo laga yaabaa in lagaa rabo inaad dib u bixisid qadarka gargaarka ee ay ahayd inaanad helin.

Haddii sheegasho qaadasho gargaar cunto ah oo dheeraad ah lagu dacweeyo qoyskaaga, warka lagu ururiyay codsiga, oo uu ku jiro dhamaan lambarada sugidda bulshada, waxa loo gudbin karaa hay'adaha Federalka iyo Gobolka, iyo waliba hay'adaha gaarka ah ee soo-ururinta daymaha, si loo qaado talaabo soo-celin qaadasho dheeraad ah.

Bixinta wixii ah war la codsaday, oo uu ku jiro lambarada sugidda bulshada ee qof kasta oo ka tirsan qoyska, waa ikhtiyaar. Hase yeeshee, Ka-soo-bixid la'aanta keenista warka la codsaday si loo go'aamiyo u-banaanaantaada gargaar waxa ka iman doona in qoyskaaga loo diido ama laga yareeyo gargaarka cuntada. Ka-soo-bixis la'aanta keenista lambar sugid bulsho waxa ka iman kara in loo diido gargaarka cuntada qof kasta oo bixin waayay lambar sugid bulsho. Wixii ah lambaro sugid bulsho ee la bixiyay waxa loo isticmaali doona loona bixin doonaa isla habka lambarada sugidda bulshada ee xubnaha qoyska ee adeeg u banaan yahay. Warka laga ururiyay codsiga waxa laga yaabaa in la siiyo saraakiisha fulinta sharciga iyada oo ulajeedadu tahay qabashada dadka ka baxsanaya sharciga.

Qof kasta oo ka tirsan qoyskaaga oo si ogaan ah u jabiya mid ka mid ah xeerarkan soo socda suurogal uma noqon doonto inuu helo gargaarka cuntada mudo ah 12 bilood marka ugu horeysa iyo mudo ah 24 bilood marka labaad. Marka saddexaad ee qof jabiyo xeerarka, mar dambe waligii ma heli doono gargaarka cuntada. Waxa kale oo maxkamaddu ku amri kartaa in qof laga saaro barnaamijka mudo dheeraad ah oo ah 18 bilood. Iyada oo ku xidhan qadarka gargaarka ee meesha ku jira, waxa kale oo qofka la ganaaxi karaa ilaa \$250,000, loo diri karaa xabsi ilaa 20 sannadood, ama labadaba.

Ha bixin war been ah, ama ha qarin war, si aad u heshid ama u sii wadid helitaanka gargaarka cuntada. Ha beddelin ama ha sii iibin gargaarka cuntada (food stamps). Wax ka ka beddelin dukumenti ah oggalaansho ku aad u heshid gargaar cunto oo aanad xaq u lahayn inaad heshid. Qoyskaagu yaanu isticmaalin gargaarka cunto ee uu leeyahay qof kale. Ha u isticmaalin gargaarka cuntada inaad ku soo iibsatis waxyaabo aan la oggalaayn, sida khamri iyo tubaako ama sigaar.

Qof kasta oo ka tirsan qoyskaaga oo maxkamadi ku hesho dambi ah iibsasho ama iibin hub, rasaas ama wax qarxaya isaga oo ku beddeshay gargaarka cuntada waligii markale suurogal uma noqon doonto inuu helo gargaarka cuntada. Qof kasta oo ka tirsan qoyskaaga oo ay maxkamadi ku hesho dambi ah iibsasho ama iibin walxaha la mamnuucay (daroogada sharci-darada ah ama dawooyinka qaarkood ee loo rabo warqad dhakhtar qoray) isaga oo ku beddeshay gargaarka cuntada suurogal uma noqon doonto inuu helo gargaarka cuntada mudo ah 24 bilood dambiga ugu horeeya, dambiga labaadna waxa uu keenaya in waligii laga mamnuuco. Qof kasta oo ka tirsan qoyskaaga oo maxkamadi ku xukunto ka-ganacsiga gargaarka cuntada oo dhan celcelis ahaan \$500 ama wax ka badan marna waligii suurogal uma noqon doonto inuu mar kale helo gargaarka cuntada.

Qof kasta oo ka tirsan qoyskaaga oo lagu helo inuu sheegay hadal been ah ama si ogaan u bixiyay war been ah oo la xidhiidha aqoonsiga iyo daganaanshaha si uu u helo wax ka badan hal gargaar isku wakhti suurogal uma noqon doonto inuu helo gargaarka cuntada mudo ah 10 sannadood.

Waxa aanu hubin karnaa diiwaanadayada iyo diiwaanada gobolada kale si loo eego haddii uu jiro qof ka tirsan qoyskaaga oo jabiya xeerarka gargaarka cuntada mar hore oo anay ahayn inuu helo gargaarka cuntada sababta oo ah wali ma dhameysan mudadii ka-joojinta ee ka timi jabinta xeerarka.

#### Digniinta Ganaaxa ee OWF

Marka aad si ogaan ah war been ah u bixisid si aad u heshid gargaar OWF oo aanad xaq u lahayn waxa ka iman kara in adiga iyo qoyskaagu aanaydun helin gargaarka OWF ilaa aad dib u bixisaan qadarka OWF ee ay ahayd inaanad helin. War been ah oo aad ogaan u bixisid waxa kale oo ka iman kara dambi ku-qaadis.

#### Wareejinta Tooska ah ee Taageerada Ilmaha & Taageerada Xaaska/Ninka (Kaliva OWF)

Ka-qaybgalka ama qaadashada OWF waxay si toos ah u keenaysa in Gobolka Ohio lagu wareejiyo xuquuqdaada dhamaan taageerada ama masruufka ay tahay in adiga iyo ilmaha aan qaangaadhka ahayni helaan (koox taageero) ee aan la bixin ilaa taariikhda, iyo dhamaan taageerada ay tahay in adiga iyo caruurta helaan mudada aad ku jirtid OWF. Wareejintaasi waxa kale oo taabanaysaa qadarada taageerada qaarkood ee aan la bixin wakhtiga aad ka baxdid OWF, laakiin qadarka uu qabso ODJFS kama badnaan doonto qadarka OWF ee adiga lagu siiyay. Wareejinta waxa ku jira xuquuqda taageerada ilmaha iyo taageerada xaaska/ninka labadaba. Haddii aad si toos ah taageero uga heshid waalidka maqan, waa inaad ku soo wareejisid hay'adda fulinta taageerada ilmaha. Wareejintu waxay hirgalaysaa bisha ugu horeysa ee ku xigta taariikhda OWF la aqbalo. Wixii ah taageero ee aad heshid ka hor intaan lagu wareejin Gobolka waxa lagu soo dari doonaa miisaaniyadda ama xisaabta si loo go'aamiyo inta OWF ah ee kuu banaan inaad heshid bilaaha ugu horeeya ka dib marka codsatid.

#### Wareejinta Tooska ah ee Bixinta Cid Saddexaad iyo Taageerada Caafimaadka

Waa inaad CDJFS u sheegtid wixii ah dabool caafimaad ee aad leedahay ama haddii qof kale uu sharci ahaan masuul ka yahay bixinta kharashka caafimaadka ee adiga iyo xubnaha qoyskaaga. Medicaid ma bixiso kharashka caafimaadka ee cid saddexaad (sida caymis caafimaad oo gaar ah) laga rabo inay bixiso.

Waa inaad oggalaatid inaad naga caawisid go'aaminta aabanimada (qofka uu yahay aabuhu) ilmo kasta oo gargaar ka hela Medicaid, amarka taageerada ilmaha ku dar bixinta taageerada caafimaadka.

Marka aad oggalaatid gargaar ka yimi Medicaid, waa inaad oggalaatid inaad ODJFS ku wareejisid xuquuqdaada bixinta caafimaad ee ka imanaysa cid saddexaad mudada aad qaadatid Medicaid. Haddii aad lacag si toos ah uga heshid caymis ama cid saddexaad si loo daboolo kharash caafimaad oo Medicaid ay adiga kaa bixisay, ama ay ka bixisay qof aad adigu sharci ahaan masuul ka tahay, waxay ODJFS xaq u leedahay inay kaa soo ceshato ama kaa hesho lacagtaa.

Marka aad oggalaatid adeegyo caafimaad oo hoos yimaada Disability Medical Assistance (DMA) (Gargaarka Caafimaadka ee Naafada), waa inaad oggalaatid inaad CDJFS ku wareejisid xaqaaga bixin caafimaad oo ka timaada cid saddexaad mudada aad ku jirta DMA. Haddii aad lacag si toos ah uga heshid caymis ama cid saddexaad oo kale si loo daboolo kharash caafimaad oo xafiiska adeegyada qoyska iyo shaqada ee degmada (county department of job and family services) uu adiga kaa bixiyay, waxa hay'adda degmadu xaq u leedahay inay kaa soo ceshato ama kaa hesho lacagtaa.

<p><b><u>Dib-u-fiirinta Dhawrista Tavada</u></b> Si nasiib ah ayaa gudaha gobolka dadka ama faylasha loo doorta si loo hubiyo in dadka gargaarka ay qaataan u banaan yahay iyo in bixinta la siiyo qadarkeedu yahay sax. Waa inaad nala shaqaysid haddii adiga faylkaa dib loo fiirino.</p> <p>Haddii aad qaadatid OWF oo aanad nala shaqeynin marka arrintaada dib loo fiirano, waxa laga yaabaa inaanuu kuu banaanaan helitaan OWF mudo ah ilaa saddex bilood.</p> <p><b><u>Warka Xuquuqda Madaniga ah</u></b> Qaybta 'Title VI' ee Xeerka Xuquuqda Madaniga ee 1964 (Civil Rights Act of 1964) ayaa noo oggalaanaysa inaanu ku weydiino war ku saabsan sinjiga/qowmiyadda. Hase yeeshee bixinta warkaasi waxay naga caawin doontaa in aanu la socono Xeerka Xuquuqda Madaniga ah ee federalka. Haddii aanad doonaynin inaad na siisid warkaa, wax dhib ah uma geysan doonto arrintaada. Haddii aanad na siinin warkaa, shaqaalaha ayaa jawaab meesha galin doona.</p>	<p><b><u>Hay'adaha Diinta</u></b> Waxay CDJFS heshiisyo la leedahay hay'adaha kale si adeegyo loo siiyo qoysaska laga yaabo inay qaataan PRC ama si ay goobo shaqo ugu noqdaan qoysaska qaata OWF. Waxa laga yaabaa in qaar ka mid ah adeegyada ama goobaha shaqada lagu qabto xarumaha hay'adaha diinta, sida kiniisadaha. Haddii aanad doonaynin in aad hay'ad diin ugu tagtid adeegyada sida goobtaada shaqo, shaqaalaha ku qaabilsan ayaa ku siin doona hay'ad kale oo kuu noqoto goobtaada shaqo ama ku siisa adeegyo.</p> <p><b><u>Su'aalaha ama Dacwadaha ku Saabsan Xuquuqdaada Madaniga ah</u></b> Haddii aad rumeysan tahay in lagu daahiyay ama lagu diiday adeegyo kuu banaanaa sababta oo ah sinji gaaga, midabkaaga, asalka wadankaaga, lab iyo dhedig mid ahaan, naafo, diin ama fikrado siyaasadeed, waxa aad la xidhiidhi kartaa hay'adaha soo socda adiga oo u gudbinaya su'aalahaaga ama waxa aad xereysan kartaa dacwad. Haddii aad soo gudbisatid dacwad qoraal ah, waa inaad ku soo dartid wakhtiga, meesha, dadka lugta ku leh, nooca dacwadda, wixii marag u ah takoorista, iyo magacaaga, adreeskaaga iyo lambarka teleefonka.</p> <p>Iyada oo la raacayo xeerka Federalka iyo U.S. Department of Agriculture (USDA) (Wasaaradda Beeraha ee Maraykanka) iyo U.S. Department of Health and Human Services (HHS) (Wasaaradda Caafimaadka iyo Adeegyada Bini'aadanka ee Maraykanka), waxa hay'addan ka mamnuuc ah takooris ku saleysan sinji, midab, asal wadan, lab iyo dhedig mid ahaan, da', ama naafo. Marka la eego xeerka Food Stamp Act (Xeerka Gargaarka Cuntada) iyo siyaasadda USDA, waxa kale oo la mamnuucay takooris ku saleysan diin ama fikrado siyaasadeed.</p>
<p>Si aad u xereysatid dacwad takooris, la xidhiidh USDA ama HHS.</p>	
<p><b><u>USDA</u></b> Director, Office of Civil Rights Room 326-W, Whitten Building 1400 Independence Avenue, S.W. Washington, D.C. 20250-9410 Teleefon: (202) 720-5964 (Cod iyo TDD)</p>	<p><b><u>HHS</u></b> Director, Office for Civil Rights Room 506-F 200 Independence Avenue, S.W. Washington, D.C. 20201 Teleefon: (202) 619-0403 TDD: (202) 619-3257</p>
<p>AMA:</p>	
<p>The Ohio Department of Job &amp; Family Services Bureau of Civil Rights 30 E. Broad Street, 37th Floor Columbus, Ohio 43215-3414 Teleefon: (614) 644-2703      Wicis Bilaash ah: 1-866-227-6353 TTY: (614) 995-9961      TTY Wicis Bilaash ah: 1-866-221-6700 Faakis: (614) 752-6381</p>	